



Qaabka ay leedahay Naqshada Benson Tech


GOOBTA DADKA U FURAN

Kaalay oo wax ka ogow naqshada Casriyeynta Benson Tech isla markaana la kulan kooxda mashruuca

Khumiista, Juun 6-deeda
5:30 galabnimo - 8:00 habeenimo

Dugsiga Sare ee Farsamada ee Benson, Qolka Kooxda Muusikada 125

Hadal soo jeedinta la xiriirta muuqaalka guud ee mashruuca 6 galabnimo and 7:00 fiidnimo



Tilmaamaha Casriyeynta

- Dib u casriyeyn buuxda oo taariikhi ah oo lagu sameynayo dhismaha muuqaalka weyn leh ee taariikhiga ah ee la dhisay 1917
- Halka hore ee laga soo gelayo dhismaha oo leh meel la soo geli karo, kaabad 'ramp' oo wadata meel la iskugu imaan/kulmi karo
- Goobta wax lugu soo bandhigo ee taariikhiga ah oo si buuxda loo casriyeeyay oo leh barxad/daarad 'balcony', iftiin/nalal la cusbooneysiyyay, AV iyo qalabka maqalka
- Goobta jimicsiga ee taariikhiga ah oo si buuxda loo casriyeeyay oo leh meel orodka loogu talagalay
- Goobta ardayda ka dhaxaysa 'commons'/ kafateeriyada oo ku taala 'bartamaha' dugsiga oo ku dhejisan/qasban barxadda bulshada ee ardayda oo la ballaariyay
- Barxad kor ka xiran/daboolan oo lagu qabto shaqada ay wadaagaan CTE
- Waxbarashada muhiimka ah ee isku meel la dejiyay/ku yaala iyo meelaha CTE oo wax lagu barto oo leh, 2 dabaq

Wakhtiga loo qabtay Mashruuca

GU'GA 2019 - GU'AGA 2021

Naqshada & Oggolaanshaha

Qaabka ay leedahay Naqshada / Horumarinta Naqshada / Dokumentiyada Dhismaha

XAGAAGA 2021 - XAGAAGA 2024

Dhismaha

Ardayda iyo shaqaalaha ayaa si ku meel gaar ah u guuri doona inta uu dhismuhu socdo.


DAYRTA 2024

Dhammeystirka dhismaha

Dhismaha Benson ee sida buuxda loo casriyeeyay ayaa la Furayaa



-  QALABKA KORONTADA EE QORAXDA KU SHAQEYYA 'SOLAR'
-  IFIINTA MAALINTII
-  YAREYNTA BIYAHA ROOBKA
-  URURINTA BIYAHA ROOBKA
-  FASALLO BANNAANKA KU YAALA
-  DIB U ISTICMAALIDA DHISMAYAASHA HADDA JIRA



Faahfaahinta Casriyeynta Benson

Dhismaha Dariiqooyinka Badan ee loogu diyaar garoobaya Qalin jabinta 'Multiple Pathways to Graduation' ayaa lagu daray

Sanadkan horraantiisii, Guddiga Waxbarashada PPS ayaa u coddeysay in la ballaariyo qorshaha mashruuca casriyeynta Benson si loogu daro barnaamijyada Dariiqooyinka Badan ee loogu diyaar garoobaya Qalin jabinta 'Multiple Pathways to Graduation' (MPG) oo hada hoygiisu yahay dhismaha Benson. Qorshaha weyn ee dib loo eegay waxaa ku jira ku darida dhisme cusub oo gooni ah oo lagu darayo meelaha baabuurta la dhigto ee oo ku dhejisan/qasban Benson. Waxaa ku jiri doonaa Daryeelka Carruurta ee Dhallinyarada Waalidka ah, Dugsiga Sare ee Alliance, DART/ Dugsiga Clinton iyo Xarunta Dib iskugu xirnaanta iyo Adeegyada. Goob fasal ah oo dheeraad ah ayaa loo qoondeyn doonaa dhismaha Benson dhexdiisa si uu hoy ugu noqdo Machadka Caalamiga ee Dadka Khibrada leh ee Oregon (PISA), Dugsiga Sare ee Pioneer, Aqoonyahanada Portland ee Galabta iyo Portland ee Xagaaga, iyo Dadka Khibrada leh ee Portland.

BOE waxaa ka go'an maalgelinta Casriyeynta Benson

Iskasta oo uu jiro hoos u dhac ku yimiday miisaaniyadda maalgelinta daymeed, PPS waxaa ka go'an casriyeynta Dugsiga Farsamada

ee Benson. Si loo xaqiijiyo tani, Guddiga Waxbarashada waxaa la filayaa in ay sanadka 2020 qaado ololaha lacag deyn ah lagu helayo si loo taageero dhammaan wejiyada dhismaha ka socda goobta Benson, mashaariic kale. Tani waxay dheeraad ku noqon doontaa lacagtii ka hortay Maalingelintii 2017-kii ee loo qoondeeyay mashruuca Benson. Haddii maalgelinta daymeed ay gudbin waayaan ama anxisin waayaan cod bixiyayaashu sanadka 2020, mashruuca Benson, ku darida lagu darayo dhismaha la qoondeeyay ee MPG, waxaa la filayaa in lagu dhammeystiro Deyn Qaadashada Credit iyo Is-aaminaada Buuxda 'Full Faith iyo Credit Bond'.

Barnaamijyada Benson Tech/MPG ayaa si ku meel gaar ah u guuri doona inta uu dhismuhu socdo

Si loo kordhiyo ammaanka iyo waxtarka mashruuca, ardayda iyo shaqaalaha oo dhan ayaa si ku meel gaar ah u guuri doona inta uu dhismuhu socdo: Shaqaalaha iyo ardayda Benson, oo ay ku jiraan barnaamijyada Dugsiga Sare ee Pioneer, ayaa u guuri doona Dhismaha Marshall oo ku yaala SE 92nd Ave, Dugsiga Sare ee Alliance, Barnaamijka Dib iskugu xirnaanta iyo DART/Clinton ayaa u guuri doona Dhismaha Kenton. PISA, Aqoonyahanada Galabta & Xagaaga 'Evening & Summer Scholars' ayaa u guuri doona Dugsiga Sare ee Grant.

MUSTAQBALKEEDA SI WADAJIR AH U DHISAYNA.

<http://BensonBond.pps.net> • BHSMod@pps.net • 503-916-2222

www.facebook.com/pps.homepage/ @PPSConnect

Portland Public Schools
School Building Improvement Bond

